



MANUAL: 2023-2024 SANDUUQA BAAHIYAHA CULUS EE DARYEELKA ILMAHA EE DCYF



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

*Buug-gacmeedkaani wuxuu bixiyaa hagitaan iyo nidaamyo ku saabsan Sanduuqa Baahiyaha
Culus ee Xanaanada Carruurta.*

NUXURKA

NUXURKA..... 1

Qaybta 1: Xogta Guud..... 2

 Ujeedo..... 2

 Waa maxay Sanduuqa Baahida Culus ee Xanaanada Ilmaha?..... 2

 Sidee Loo Go'aamiyaa Lacagta? 2

 Maxaa Loo Isticmaali Karaa Lacagta? 3

Qaybta 2: Xaq u yeelashada..... 3

Qaybta 3: Sida loo Codsado 3

 Shuruudaha Codsiga iyo Helitaanka Luuqadda 4

 Habraaca 4

 Kahor intaadan codsan, waa inaad leedahay akoonka barnaamijka Bixiyaha ee WA Compass. 4

 Codsiga 4

 Marqaatiyada 5

Qaybta 4: Xulashada iyo Abaalmarinta..... 5

 Xulashada Codsadaha 5

 Xisaabinta Deeqda 5

 Kala hormarinta 5

 Helida Lacagta Deeqda 6

Qaybta 5: Abaalmarinta Kadib..... 6

 Ka warbixinta..... 7

 Kaydinta Rasiidhada..... 7

Qaybta 6: Meesha Laga Helo Kaalmada..... 8

 Macluumaad Dheeraad ah..... 8

Lifaaqa A: Tilmaamaha codsiga oo Tallaabo-tallaabo ah..... 9

Lifaaqa B: Su'aalaha Inta badan La Isweydiyo..... 16

Lifaaqa C: Alaab/adeegyo aan u qalmin..... 23

Qaybta 1: Xogta Guud

Ujeedo

Sharciga [Fair Start for Kids Act](#) (FSKA) wuxu ku haga Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Gobolka Washington (DCYF) inay qaybiso lacag si kor loogu qaado arimaha bulshada ee loo dhan yahay, la yareeyo bay'adaha xaddidan iyo la taagero bixiyayaasha u adeega carruurta leh daahin koritaan, kuwa naafada ah, kuwa leh baahi dhaqan, ama kuwo kale oo leh baahiyaha gaarka ah. Lacagaha waxaa lagu qaybiyaa ayado loo marayo Sanduuqa Baahiyaha Culus.

Waa maxay Sanduuqa Baahida Culus ee Xannaanada Ilmaha?

Hadafka Sanduuqa Baahiyaha Culus ee Xannaanada Carruurta waa maalgelinta daryeelka xannaanada ilmaha ee hore iyo bixiyayaasha waxbarashada. Waxaa loogu talagalay in lagu hormariyo arimaha bulshada ee loo dhan yahay, la yareeyo xaddidnaanta degaanka iyo in la taagero bixiyayaasha u adeegaya carruurta dib u dhaca korriinka qaba, kuwa naafada ah, kuwa leh baahiyaha dabeecadda, ama baahiyaha kale ee gaarka ah.

Lacagta deeqda waxaa loo isticmaali karaa in lagu caawiyo bixinta xubnaha cusub ee shaqaalaha ama kordhinta saacadaha shaqaalaha, adeegyada daweynta, hagaajinta xarunta si loogu hoggaansamo shuruudaha u hogaansanaanta Americans with Disabilities Act (ADA) shuruudaha gelitaanka ama baahiyaha dabeecadda, iyo agabka iyo qalabka taageerada iyo la qabsiga.

Sidee Loo Go'aamiyaa Lacagta?

DCYF waxay tixgelin doontaa soo jeedinta maalgelinta ee bixiyayaasha codsiga deeqda. Waxaan ka codsaneynaa bixiyayaasha in ay qiimeeyaan baahiyaha ubadka (carruurta) ku jira daryeelkooda iyo sida barnaamijkooda loo xoojin karo si loo daboolo baahiyahaas, ka dibna u isticmaalaan macluumaadkan si ay u sameeyaan codsi xog ogaal ah oo u oggolaanaya inay horumariyaan adeegyadooda.

Fadlan ka eeg shaxda hoose si aad u ogaatid qaddarka ugu badan iyo kan ugu yar ee bixiyuhu uu codsan karo. Codsiyada codsanaya wax ka baxsan lacagtan lama tixgelin doono.

Nooca Bixiyaha	Qadarka ugu yar	Inta ugu badan
Ruqsad haysta, shahaado haysta, ama shahaado u haysta bixiyayaasha kaliya ee lacag bixinta	\$5,000	\$100,000
Bixiyayaasha qoyska, saaxiibka, iyo deriska (FFN)	\$100	\$2,000

DCYF waxa laga yaabaa inay beddesho cabbirka ama qaab-dhismeedka abaal-marinaha wareegyada mustaqbalka ee maalgelinta deeqda taasoo qayb ka ah habka sifaynta deeqda.

Tirada iyo kala duwanaanta abaal-marintu waxay awood u siinaysaa DCYF inay taageerto bixiyayaal kala duwan oo leh baahiyo kala duwan.

Maxaa Loo Isticmaali Karaa Lacagta?

Lacagta deeqda waxaa loo isticmaali karaa:	Lacagta deeqda looma isticmaali karo:
<ul style="list-style-type: none"> • Ku-daridda xubnaha shaqaalaha ama kordhinta saacadaha shaqaalaha ee hada ku shaqeeya • Adeegyada daaweynta • Horumarinta xarunta si loogu hoggaansamo shuruudaha gelitaanka ADA ama baahiyaha dabecadda • Qalabka iyo taageerada iyo la qabsiga 	<ul style="list-style-type: none"> • Kharashyada raasumaalka ah sida mashaariicda waaweyn ee dhismaha ama dayactirka • Taageerada goobaha aan ahayn goobta lacagta lagu siiyay • Kharashaadka safarka oo ay ku jiraan huteelada, baabuurta kirada ah, qiimaha diyaarada • Gadashada baabuur • Kharashyada hawlgalka guud • Kor u qaadista shaqaalaha, gunnooyinka, gunnooyinka haynta • Dib u eeg liiska alaabta aan u qalmin ee ku jira lifaaqyada

Qaybta 2: Xaq u yeelashada

Sanduuqa Baahiyaha Culus ee Xannaanada Ilmaha waxa lagu bixiyaa habka deeqda ee tartanka ah. Soo gudbinta arjiga ma dammaanad qaadayso in bixiye kasta oo u qalma uu heli doono abaal-marin deeq ah. Codsadayaasha xaq u leh waxay hal mar oo keliya heli karaan Sanduuqa Baahiyaha Culus iyadoo loo eegaya sanad xisaabeedka gobolka.

Bixiyayaasha xaq u leh waxaa ka mid ah:

- Shati furan haysta, shahaado la siiyey, ama haysta shahaadada lacag bixinta kaliya ee bixiyaasha xanaanada cunugga*
- Bixiyayaasha qoyska, saaxiibka, iyo deriska (FFN) ee laga-dhaafay shatiga kuwaas oo ugu adeegay caruurta la kabo ugu yaraan hal cunug afartii bilood ee la soo dhaafay ama laba ka mid ah saddexdii bilood ee la soo dhaafay una codsaday kabidda Nidaamka Lacag bixinta Adeegga Bulshada (SSPS) wakhtiga codsiga.

* Bixiyayaasha shatiga haysta ee u adeegaya boosaska ECEAP uma qalmaan Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafan ee Xanaanada Carruurta. Taa beddelkeeda, waa inay ka dalbadan Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafan iyagoo sii maraya qandaraaslayaashooda ECEAP.

Si aad xaq ugu yeelato, bixiyayaasha waa in ay haystaan carruur hadda ku diiwaangashan daryeelkooda kuwaas oo qaba baahiyo dabecadeed, dib u dhac koritaaneed, naafo, ama baahiyo kale oo gaar ah.

Qaybta 3: Sida loo Codsado

Dhammaan bixiyeyaasha waxaa looga baahan yahay inay lahaadaan akoonka Xariirka Bixiyaha ee WA Compass ka hor inta aysan buuxin codsiga Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafan ee Xanaanada Carruurta.

Codsigu wuxuu kaaga baahan yahay inaad ka jawaabto su'aalaha ku saabsan barnaamijkaaga oo aad sharaxdo qorshahaaga isticmaalka lacagaha deeqda, haddii lagu siiyo. DCYF waxay si adag ugu talinaysaa inaad dib u eegto arjiga ka hor intaadan codsan si aad u diyaariso jawaabahaaga, dib ugu eegtid iyaga oo ka soo horjeeda qoraalada la bixiyay, oo aad hubiso inaad ku qanacsan tahay saxnaanta iyo dhamaystirka jawaabahaaga. Bixiyeyaashu waxay keydin kara codsigooda oo soo celin karan ka hor intaysan soo gudbin.

Codsiyada dib looma eegi doono ilaa wakhtiga codsigu xidhmo. In codsiga wakhtigeeda ka hor aad buuxiso wax faa'iido ah kuma jirto. DCYF waxay kugula talinaysaa inaad si tartiib ah ku buuxiso codsiga oo aad dib u eegto jawaabahaaga.

Haddii aad rabto in lagaa caawiyo dib u eegista codsigaaga, oo ay ku jirto qorshahaaga aad soo jeedisay ee lacagaha, fadlan la xiriiir lamaanahayaga kaalmada farsamada, Machadka Imagine. Macluumaadka Caawinta Farsamada ayaa laga heli karaa [halkan](#). DCYF waxay si aad ah ugu dhiirigelisaa bixiyeyaasha inay ka faa'iidaystaan la-hawlgalayaashayada caawimada farsamada si ay u buuxiyaan codsiga.

Xilliga kama dambaysta ah ee soo gudbinta codsiga waa Janaayo 3, 2024, 5:00 galabnimo PDT. DCYF waxay aad uguula talinaysaa in bixiyayaasha aanay sugin ilaa daqiiqada u dambaysa si ay u buuxiyaan codsiga. Soo gudbinta codsigaaga ka hor wakhtiga kama dambaysta ah waxay kaa caawin doontaa inaad ka hortagto arrimo farsamo ama dhibaatooyin daqiiqadaha ugu dambeeya kuwaas oo laga yaabo inay kaa horjoogsadaan inaad soo gudbiso codsigaaga. DCYF ma awoodo inay aqbasho codsiyada ka dib wakhtiga kama dambaysta ah.

Shuruudaha Codsiga iyo Helitaanka Luuqadda

DCYF waxay ku dhiirigelisaa codsadaayaasha aan lahayn waayo-aragnimo deeq-qoris inay codsadaan. Ma takoorno codsiyada ku qoran luqadaha aan Ingiriisiga ahayn, ama codsiyada leh khaladaad naxwe ahaaneed.

DCYF waxay ku siin doontaa dhammaan agabyada Ingiriisiga, Isbaanishka, iyo Soomaaliga. Bixiyeyaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay codsiyadooda ku soo gudbiyaan luqadda ay dareemayaan inay u fududahay: Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali, ama isku darka qaarkood. Si loo hubiyo in dhammaan codsiyada ay helaan tixgelin siman, codsiyada lagu soo gudbiyo Isbaanishka ama Soomaaliga waxaa loo turjumi doonaa Ingiriis.

Iyada oo qayb ka ah habka dib u eegista, dhammaan xubnaha kooxda ee xisaabiniya deeqda waxay helayaan tababar ku saabsan halbeegyada qoraalka, oo ay ku jiraan shuruudaha ah in naxwaha iyo higaada *aan* loo tixgelin inay qayb ka yihiin habka qiimaynta deeqda.

Habraaca

Kahor intaadan codsan, waa inaad leedahay akoonka barnaamijka Bixiyaha ee WA Compass.

1. Si aad u samaysato akoon WA Compass, fadlan la xidhiidh dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov ama wac 866-627-8929.
 - a. Si aad u cusboonaysiiso magacaaga, ciwaankaga, telifoon lambarkaaga, iyo ciwaanka iimaylka, waxaad u baahan doontaa inaad la xidhiidho shati bixiyahaaga.
 - b. Furaha akoonka waxaa la siiyaa agaasimaha iyo xiriirka aasaasiga ah. Furaha akoonka waxaa siidoo kale la siin karaan dad kale oo dheeraad ah oo loo xilsaaray.

Codsiga

2. Bixiyeyaasha waxay soo gudbiyaan arjiga iyagoo isticmaalaya [Xariirka Bixiyaha Kombuyuutarka ee WA Compass](#).
 - a. Kahor intaadan gudbin codsigaga, fadlan dib u eeg [araajida iyo hagaha su'aalaha](#), oo ka kooban dhamaan su'aalaha codsiga iyo talooyinka ku saabsan sida looga jawaabo. DCYF waxay si adag kugula talinaysaa inaad dib u eegto hagahan, iyo sidoo kale [hagaha dhibcaha xisaabinta deeqda](#), ka hor inta aanad buuxin codsigaaga.
 - b. Si aad u hesho tilmaamo faahfaahsan iyo sawiro muujinaya sida codsigaaga loogu soo gudbiyo barnaamijka, fadlan eeg Hagaha Sida loo Gudbiyo Codsiga Sanduuqa Baahiyaha Culus ee Lifaafa A.
 - c. Si aad u bilowdo, gal [WA Compass Provider Portal](#) , u gudub qaybta Macluumaadka Deeqaha, dooro "Deeqooyinka Hadda" oo markaasna dooro arjiga Sanduuqa Baahiyaha Culus ee DCYF. Markaad ka jawaabto dhowr su'aalo oo isku taxan, waxaad u gudbin doontaa codsiga.
3. **Marka codsiga la gudbiyo, bixiyeyaasha ma awoodaan inay wax ka beddelaan codsiga.** Si taxadar leh u eeg jawaabahaaga ka hor intaadan gudbin codsigaga. Hubi in codsiga aad gudbinayso uu ku hoos jiro goobta saxda ah ee goobta. DCYF ma beddeli doonto waxa ku jira codsiga la gudbiyay.

Marqaatiyada

Markaad buuxiso arjiga Sanduuqa Baahida Isku-dhafan ee Xanaanada Carruurta, codsabayaashu waxay ogolaadaan shuruudaha iyo shuruucda soo socda:

- *Waxaan cadeynayaa in macluumaadka aan ku bixiyay codsigan uu yahay mid runa oo sax ah.* Agree
- *Waxaan ku bixin doonaa abaalmarinta Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafan ee Xanaanada Ilmaha iibka lagu sheegay codsigan deeqda ah.* Agree
- *Waxaan ku qarash gareyn doonaa Sanduuqa Baahiyaha Adag hal sano gudaheed markaas helo lacagaha.* Agree
- *Waxaan fahamsanahay in codsigayga la diidi doono haddii aan codsado maalgelin kharash kasta oo la diiday.* Agree

- Waxaan u sheegi doonaa DCYF sida aan u kharash gareeyo Sanduuqa Baahiyaha Culus ee Xanaanada Carruurta. Tan waxa ku jiri doona haynta rasiidhada iyo dukumeentiyada dhammaan wax iibsiga lagu sameeyay lacagta deeqda ah.
 Agree
- Waan dhamaystiri doonaa oo soo gudbin doonaa sahanka saddex biloodlaha ah ee ay DCYF ii soo dirto. Waxaan fahamsanahay in tani ay tahay waxyaabaha looga baahan yahay helitaanka abaalmarinta deeqda. Haddii aan helo maalgelin oo aanan dhamaystirin sahanka, waxaan ku xadgudbayaa shuruudaha Sanduuqa Baahida Isku-dhafan ee Xanaanada Carruurta waxaan u soo celin doonaa dhaqaalaha deeqda DCYF.
 Agree
- Haddii aan xidho Shatigayga ka hor inta aanu dhammaan wareegga halka sano ah, waxaan DCYF u soo celin doonaa wixii deeq ah oo aanan kharash garayn. Wali waxaan mas'uul ka ahaan doonaa inaan u keeno warbixinta iyo rasiidhada DCYF si aan faahfaahin uga bixiyo dhaqaalihii aan bixiyay, iyadoon la eegin xaalada furanta ama xirnanta.
 Agree
- Haddii aanan u hoggaansamin shuruudaha warbixinta DCYF ama aanan muujin karin in lacagaha lagu kharash gareeyay si waafaqsan codsigayga, waxaan ku xad gudbay shuruudaha Sanduuqa Baahida Isku-dhafka Xanaanada Carruurta waxaan u soo celin doonaa dhaqaalaha deeqda DCYF.
 Agree

Qaybta 4: Xulashada iyo Abaalmarinta

Xulashada Codsadaha

Sanduuqa Baahiyaha Culus ee Xanaanada Ilmaha waxa lagu bixiyaa habka deeqda ee tartanka ah. Dhammaan codsiyada lagu helo muddada codsiga waa la eegi doonaa. Marka hore, dhammaan codsiyada waxaa dib loo eegi doonaa xaq u yeelashada. Marka labaad, dhammaan codsiyada waxa darajo loo siinaya iyadoo loo [eegayo Dhibcaha Xisaabinta Deeqda](#). Codsiyada dhaliyay celcelis ahaan sagaal dhibcood ama ka sareeya ayaa xaq u leh in ay horay u socdaan habka dib u eegista. Kadib habka dhibcaha bilowga ah, DCYF waxay isugu yeeri doontaa guddi dib u eegis ah oo khubaro mawduuca ah si ay u sameeyaan go'aannada maalgelinta.

Marka codsadaha la siiyo lacagaha deeqda ah, dhammaan lacagaha waa in lagu kharash gareeyaa kharashyada ku taxan codsigooda la ansixiyay [hal sano gudaheed](#) marka la helo abaalmarinta deeqda.

Xisaabinta Deeqda

Codsiyada waxaa lagu saleyn doonaa kaliya nuxurka iyo shuruudaha iyadoo loo eegayo [goraalka dhibcaha](#).

Codsadayaasha waxaa laga yaabaa in dhibco lagu siiyo alaab ay shegeen in ay u baahan yihiin; dhibco badan waxaa laga yaabaa in ay ku helaan sharaxayo sida codsiga u caawin doono ilmaha (carruurta) ay daryeelayaan; iyo dhibcaha ugu badan inay ku helaan sharaxida cilmi-baadhisto ay sameeyeen, qorshaynta, ama hannaanka u horseeday go'aankooda.

Bixiyeyaasha ka shaqeeya meelaha loo yaqaan saxaraha daryeelka carruurta ee helitaan aadka u daran iyo kuwa u adeega ama ku yaal meelaha la takooro, bulshooyinka dakhligoodu hooseeyo waxay heli doonaan dhibco dheraad ah.

Si horey loogu socdo habka dib u eegista, codsadyaashu waa inay helaan celcelis ahaan 9 dhibcod ama ka sareeya, ka hor dhibcaha gunnada. Codsiyada hela wax ka yar 9 dhibcod uma qalmaan tixgelinta maalgelinta.

Kala hormarinta

Haddii tirada codsiyada xaqa u leh ee la helay ay ka bataan maalgelinta ay DCYF haysato, DCYF waxa laga yaabaa inay mudnaanta siiso codsiyada nooc kasta oo bixiye ah oo helay wadarta dhibcaha ugu sarreeya oo buuxiya hal ama labadaba shuruudaha gunnada. Guddi dib u eegis ah oo khubaro mawduuca ah ayaa dib u eegis dhamaystiran ku samayn doona codsiyadan u dambeeya si ay u sameeyaan go'aannada maalgelinta.

Guddiga dib u eegista ayaa qiimeeya codsiyada u dambeeya iyagoo ku saleysan:

- 1) Codsaduhu ma fulinayaa ujeeddada Sanduuqa Baahiyaha Culus ee Xannaanada Carruurta?
- 2) Marka laga reebo kuwan ugu-dambaysta ah, codsigan gaarka ah ma soo saari doonaa saamaynta ugu fiican ee carruurta leh baahiyo adag?

Codsiyada ka hela mudnaanta ugu sareysa guddiga dib u eegista waxay heli doonaan abaalmarin ilaa maalgelinta la dhammeeyo.

Helida Lacagta Deeqda

Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafan ee Xannaanada Carruurta waxa uu furmi doonaa dayrta sannad kasta. Codsigu wuxuu furmi doonaa ku dhawaad siddeed toddobaad. Marka la go'aamiyo maalgelinta, codsadyaasha waa la ogeysiin doonaa.

FY 2023-24, taariikhuhu waa sida soo socota:

Codsigu waa furmay	Nofeembar 15, 2023
Codsigu waa xidhmayaa	Janaayo 3, 2024 saacadu markay tahay 5:00 galabnimo.
Codsiga Dhibcaha Hore	Janaayo 2024
Codsadayaasha waa la ogeysiiyay inay yihiin kuwa u dambeeya iyo in kale	Febraayo 2024
Guddiga dib u eegista ayaa kulmaya	Febraayo/Maarso 2024
Codsadayasha kama dambaysta ah waxaa la ogeysiinayaa go'aamada abaalmarinta	Maarso 2024
Lacag bixinta wa la diyaariyay	2-4 toddobaad kadib ogeysiisyada oggolaanshaha

Bixiyeyaasha waxay ku heli doonaan lacagta deeqda hal mar. Fadlan ogow in habbaynta lacag-bixinta elegtarooniga ah iyo Adeegga Boosta ee Maraykanku ay qaadan karaan dhawr maalmood oo shaqo ah, taas oo saamayn karta taariikhda saxda ah ee bixiyeyaasha ay helayan lacagaha.

DCYF waxay lacag bixinta ku soo habeen dontaa SSPS. Bixiyeyaasha waxay heli doonaan lacag bixinta Sanduuqa Baahiyaha Culus ee DCYF si la mid ah sida ay u helaan lacagaha SSPS. Faahfaahinta ku saabsan wareegyada mustaqbalka ayaa la bixin donaa waqti danbe.

Qaybta 5: Abaalmarinta Kadib

Haddii lagu siiyo deeq, u diyaar garow inaad soo gudbiso rasiidhada alaabta iyo kharashyada aad u isticmaashay maalgelinta deeqda. Waxa kale oo lagaa doonayaa inaad soo gudbiso warbixinada saddex biloodlaha ah ee ku saabsan horumarkaaga adoo isticmaalaya sahan ay DCYF bixin doonto. Marka codsadaha la siiyo lacagta deeqda, dhammaan lacagaha waa in lagu kharash gareeyaa kharashyada ku taxan codsigooda la ansixiyay hal sano gudaheed marka la helo abaalmarinta deeqda.

Soo godbinta warbixinta waxaa loogu talagalay in ay caawiso deeq bixiyayaasha hadda iyo kuwa mustaqbalka. Habkani wuxuu ka caawin doonaa DCYF iyo deeq-bixiyeyaasha inay aqoonsadaan ciladaha soo koraya iyadoo ay weli jirto wakhti lagu xalliyo. Haddii bixiyayaasha ay arrin ku sheegaan warbixintooda, DCYF way la xidhiidhi doontaa si ay u bixiso gargaar dheeraad ah ama waxa la soo xiriiri doona la-hawlgale caawimo farsamo. Macluumaadka laga bartay sahan ayaa wareegyada mustaqbalka ka caawin doona DCYF xaga qaabaynta iyo hagaajinta barnaamijkeeda.

Ka warbixinta

Warbixinta deeqda saddex-biloodlaha ah ayaa loo baahan doonaa ilaa deeqda la dhameeyo. Saddexdii biloodba mar, dadka deeqda qaatay waxay soo gudbin doonaan war ku saabsan horumarkooda, iyadoo ka jawaabaya su'aalaha soo socda:

- Sidee waaya-aragnimadaada ugala shaqaynaysaa waxqabadyada ay maalgeliso Abaalmarinta Baahiyaha Isku-dhafan ee Xannaanada Ilmaha ilaa hadda?
- Ma isticmaashay guud ahaan lacagta abaal-marinaha Sanduuqa Baahiyaha Adag wakhtigan?
- Ma u malaynaysaa inaad u baahan doonto inaad isbeddel ku samayso qorshahaagii Kharajka Baahiyaha Adag ee asalka ah?
- Deeq-lacageedkani ma kaa caawinayaa inaad gaadho yoolalkaaga taageerada carruurta leh baahiyo adag?
- Natijadu ma ka duwan tahay yoolalkaagii asalka ahaa?
- Maxaa isbedel ah oo aad samaynaysaa, haddii ay jiraan?
- Maxaad baratay ilaa hadda? Wax la yaab leh ma aragtay?
- Ma jiraan wax kale oo aad jeclaan lahayd inaad nooga sheegto qorshahaaga mashruuca, wakhtiga, ama miisaaniyadaada? Tusaale ahaan, wax caqabado ah ma la kulantay?
- Ma u baahan tahay wax gargaar ama gargaar dheeraad ah wakhtigan?

Haddii warbixinta aan la gudbin, bixiyaha waxaa loo tixgelin doonaa inay ku xadgudubeen heshiiska deeqda waxaana laga yaabaa in looga baahdo inuu soo celiyo maalgelinta.

Kaydinta Rasiidhada

Bixiyeyaasha waxaa looga baahan yahay inay hayaan dhammaan rasiidhada iibka lagu sameeyay Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafan ee Xannaanada Carruurta waxaana laga yaabaa in la waydiiyo inay u soo gudbiyaan rasiidhada DCYF. Haddii bixiyaha aanu awoodin inuu soo gudbiyo rasiidhada, waxa laga yaabaa in looga baahdo inay Gobolka Washington u soo celiyaan qayb ama dhammaan dhaqaalaha deeqda.

DCYF waxay dooran doontaa muunad gaar ah oo deeq-heleyaasha si ay u soo gudbiyaan rasiidhada iibka ee la xidhiidha deeqda. Bixiyeyaasha loo xushay dib u eegista rasiidka waxaa la ogeysiin doonaa ka dib marka ay dhamaato muddada kharashka deeqda ee halka sano ah.

DCYF waxay ogtahay tahay inay jiraan siyaabo badan oo lagula socon karo rasiidhada deeqdaada. Hoos waxaa ah fikrado aad isticmaali karto:

1. **Kaydi dhammaan rasiidhada.** Qodobkan lama soo koobi karo. Horumarinta nidaamka habaysan oo aad ku buuxiso rasiidhada waxay ku badbaadin kartaa wakhti badan haddii lagu doorto dib u eegista rasiidhkaga.
2. **Sawir ka qaad rasiidhada oo hay ugu yaraan shan sano.** Tani waxay kaa caawinaysaa haddii khadka rasiidka ku qorani uu yaraado. Haddii DCYF aysan akhrin karin rasiidka, ma awoodi doonaan inay aqbalaan rasiidka. DCYF waxay ogoshahay rasiidhada elektarooniga ahaan lagu kaydiyo. Si kastaba ha ahaatee, waa fikrad wanaagsan inaad meel kale ku kaydiso rasiidhada lacala haddii u hard drive kaaga uu xumaado.

3. **Ku sawir rasiidhadaada telefoonkaaga casriga ah.** Tani waa fikrad aad u wanaagsan waxaana jira apps kala duwan oo ku caawin kara. Tignoolajiyada maanta awgeed, "waxaad awodaa inaad faahfahinta raasida meel ku qortid markaasna aad ka qaadid sawir. Laakin xasuuso inaad sidoo kale kaydiso faylalka app-kaas.
4. **Haddii ay suurta gal tahay, rasiidhadaada ha lagugu soo diro iimayl,** Tani waa fikrad aad u wanaagsan, barnaamijyo badan aad soo iibsankarto way jiraan.
5. **Ha isku hallaynin bayaanada bangiga, bayaanada kaadhka-kreditka, ama jeegaga la tirtiray.** Kuwani waa muhiim, laakiin kuma filna haddii aan la helin rasiidhada dhabta ah. DCYF waxaa laga yaabaa inay ku aragto bayaanka kaadhka deynta inaad ku bixisay \$435 Home Depot-ka, laakiin wax fikrad ah kama hayaan waxa dhabta ah ee aad ku soo iibsatay. Waxay noqon kartaa inaad soo iibsatay birta barbecue halkii lagaa rabay inaad soo iibsatid biraha gacanta ee ADA ee aad ku qortay codsigaaga deeqda. Ujeedooyinka diiwaan gelinta, bayaanada bangiga, bayaanada kaadhka deynta, iyo jeegaga la joojiyay ayaa ah kuwo aad u wanaagsan, laakiin tafaasiisha wax kala iibsiga, ee rasiidhka ku qoran, ayaa muhiim u ah dib u eegista rasiidka DCYF.
6. **Iska ilaali lacag caddaan ah.** Tani waa mid aad muhiim u ah. Lacag caddaan ah waa adag tahay in la raad raaco, waa fududahay in la kharash gareeyo, oo ku dhawaad macquul maha in lagu heshiiyo rasiidhada. Isticmaal kaararka lacagta iyo kuwa deynta; waxay ku siinayaan warbixino bille ah oo si fudud ula jaan qaadi kara rasiidhadaada.
7. **Codso caawimo haddii aad u baahan tahay.** Habka dib u eegista rasiidka loolama jeedo inuu ku cabsi geliyo! Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan waxa rasiidhada iyo dukumentiyada loo baahan yahay, fadlan weydii. Waxaan halkaan u joognaa inaan caawinno.

Qaybta 6: Meesha Laga Helo Kaalmada

DCYF waxay iskaashi la samaysaa Machadka Imagine si ay u bixiso kaalmo farsamo oo adag oo luuqado badan ah, abaal-marin ka hor iyo ka dib labadaba.

- Kaalmada Farsamada iyo Helitaanka Luuqadda
 - Haddii aad u baahan tahay caawimo farsamo, oo ay ku jirto caawinaada luqadaada, hagista u diyaarinta iyo gelitaanka arjiga, ama su'aalaha ku saabsan kharashka iyo kaydinta rasiidhada/dokumentiga, waxaad la xidhiidhi kartaa Machadka Imagine.
 - Imagine institute
 - Taleefanka: 206-492-5249
 - Iimayl: CCSG@imaginewa.org
- Su'aalaha Codsiga
 - Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan codsiga, wakhtiga deeqda, ama su'aalaha kale ee u gaarka ah deeqda, fadlan iimayl u dir dcyf.childcaregrants@dcyf.wa.gov
- Isku xirka Xariirka Bixiyaha Compass WA
 - Si aad u gasho akoonkaaga, isticmaal xidhiidhka galitaanka halkan: <https://wacompass.force.com/PP>LoginPage#>
- Ma soo gali karo?

- Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo gelitaanka akoonkaaga Xariirka Bixiyaha ee WA Compass, fadlan iimayl u dir dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov ama wac 866-627-8929

Macluumaad Dheeraad ah


[Bogga Maalgelinta Baahiyaha culus](#)

Lifaaqa A: Tilmaamaha codsiga oo Tallaabo-tallaabo ah


DCYF waxay si aad ah ugu dhiirigelisaa bixiyeyaasha inay ka faa'iidaystaan kaalmada la-hawlgalayaashayada farsamada si ay u buuxiyaan codsiga.

Waxaan kugula talineynaa isticmaalka [Horudhac Codsiga iyo Hagaha Su'aalaha](#) si aad u diyaariso jawaabahaaga ka hor inta aanad gelin codsiga WA Compass. Waad kaydsan kartaa codsigaaga oo waad ku soo noqon kartaa wakhti dambe. Fadlan wakhti sii buuxinta codsiga oo marka aad kalsooni ku qabtid, oo aad dhammayso, fadlan soo gudbi. Codsiyada la keydiyay ee bixiyuhu uusan soo gudbin kuwaas uma qalmaan tixgelin. Marka aad gudbiso codsigaga, ma samayn kartid wax tafatir ah, sidoo kale DCYF ma samayn doonto wax tafatir ah oo adiga ku metelaya.

1. Gal [Xariirka Bixiyaha Compass WA](#).
2. Guji badhanka "Akhbaarta Deeq".



3. Dooro Luuqad, haddii aad jeclaan lahayd inaad bogga ku aragto luqad aan Ingiriisi ahayn.
4. Guji "Deeqooyinka Hadda."




5. "Deeqooyinka Hadda" waxay tusinaysaa dhammaan fursadaha deeqaha ee hadda furan, iyo haddii bixiyaha uu hore u dalbaday iyo in kale. Guji "Complex Needs Fund."
6. Codsiga wuxuu ku furmay mareega cusub.
7. Dooro Luuqad si aad codsiga ugu aragto Ingiriis, Isbaanish, ama Af-Soomaali.



8. Guji "Confirm".



9. Akhri oo ka jawaab su'aalaha 1-5.
Talo: Si aad u weynayso sanduuqa qoraalka, ku dhufo dhinaca midig ee hoose ee sanduuqa adoo isticmaalayo mouse ka, oo ka dibna jiid si aad u beddesho cabbirka.



10. Su'aalaha 6 ilaa 9 waxay sheegayan afarta qaybood ee kala duwan ee kharashka la ogolyahay. Uma baahnid inaad u codsato maalgelin afarta qaybood oo dhan. Kaliya dooro qaybta/qaybaha kharash-garaynta ee aad u codsanayso maalgelinta. Tusaale ahaan, haddii aad u codsanayso maalgelin adeegyada daawaynta, marka hore ka dooro sanduuqa halkan.

6. Are you requesting funds for staffing?

7. Are you requesting funds for therapeutic services?

8. Are you requesting funds for facility improvements to comply with ADA accessibility requirements or behavioral needs? Examples include, but are not limited to, building ramps, widening doors, creating a quiet space, etc.*?
 *Major renovations are not eligible for funding. They are defined as (1) structural changes to the foundation, roof, floor, exterior, or load-bearing walls of a facility, or the extension of a facility to increase its floor area, or (2) extensive alteration of a facility such as to significantly change its function and purpose, even if such renovation does not include any structural change.

9. Are you requesting funds to purchase supportive and adaptive materials or equipment?

Kadib xulashada sanduuqan, saddex su'aalood oo dheeri ah ("su'aalo-hoosaad") ayaa soo bixi doona. **Jawaabahaaga su'aalahan ayaa buundooyin la siin doona. Macluumaadka ku saabsan sida jawaabaha darajo loo siin doono, fadlan dib u eeg Hagaha Dhibcaha Codsiga.**

7. Are you requesting funds for therapeutic services?

Please describe how the requested funds will provide targeted care or support for children with behavioral needs, developmental delays, disabilities, or other unique needs currently participating in your program. (5 points)

How will adding these resources improve the quality of care for children with complex needs? (5 points)

Please provide the cost of the therapeutic service that you are applying for: (5 points)

Therapeutic Service	Estimated cost	Basis for estimate – how did you arrive at the estimated cost?
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>	<input type="text"/>
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>	<input type="text"/>

Su'aasha saddexaad hoosteeda waxay ku weydiin doontaa inaad taxdo kharashka adeegga(adeegyada) daaweynta ee aad codsanayso. Fadlan geli jawaabahaaga jadwalka.

Jadwalku wuxuu leeyahay saddex sadar.

Ku tax magaca ama nooca adeegga daawaynta sadarka kowaad.

Please provide the cost of the therapeutic service that you are applying for:

Therapeutic Service	Estimate
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>

Sadarka ku xiga, ku tax dhammaan kharashka la qiyaasay ee adeeggaas. Haddii adeega aad codsanayso uu ku salaysan yahay saacadii, Usbuucii, bishii, fadlan gali qiimaha lagu qiyaasay adeegan mudada deeqda (hal sano).

Geli nambarka oo dhan kaliya. Ha gelin wax qoraal ah, hakad, ama jajab tobanle ah. Qadarka lacagta soo harta, fadlan soo koob ama hoos u dhig si waafaqsan lamberka 10aad. Tusaale ayaa hoos ku qoran.

Haddii aad codsanayso shay qiimahiisu yahay \$60.97, waxaad geli doontaa "61".
Haddii aad codsanayso adeeg ku kici doona \$10,782.41, waxaad geli doontaa "10781"

cost of the therapeutic service that you are applying for:

service	Estimated cost	Basis
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>	<input type="text"/>
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>	<input type="text"/>


Kadib geli saldhigga qiyaastaada adoo ka jawaabaya su'aasha "sideed u xisaabisay kharashkan?"

service that you are applying for: (5 points)

Basis for estimate – how did you arrive at the estimated cost? Example – cost information based on a professional quote or cost per
<input type="text"/>
<input type="text"/>

Sii wad inaad geliso dhammaan adeegyada daawaynta ee aad maalgelinta u codsanayso. Geli hal magac ama nooca adeega layn kasta. Haddii aad uga baahan tahay layn dheeraad ah jadwalka gudaheeda, guji **+Ku dar Shay Cusub** dhanka bidix ee jadwalka hoosteeda.

Please provide the cost of the therapeutic service that you are applying for: (5 points)


Therapeutic Service	Estimated cost	Basis for estimate – how did you arrive a
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>	<input type="text"/>
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>	<input type="text"/>
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>	<input type="text"/>
<input type="text"/>	\$ <input type="text"/>	<input type="text"/>
+Add New Item 		
Total: \$0		

Marka aad dhammayso gelitaanka adeeg kasta iyo kharashka la qiyaasay, wadarta guud ee qaybtan kharashka gaarka ah waxay ka muuqan doontaa jadwalka hoosteeda.

Dib u eeg wadarta shaxdan si aad u hubiso in ay muujinayso dhamaan qadarka maalgelinta ee aad u codsanayso qaybtan khaaska ah.

- Buuxi nidaamkan qayb kasta oo kharash ah oo aad maalgelin u codsanayso.
- Su'aasha 10: Ku qor Tirada Guud ee Deeqaha ee lo codsaday sanduuqa qoraalka. Jawaabtani waa wadarta guud ee maalgelinta qayb kasta oo kharash ah oo la isku daray.

11. Total Grant Amount Requested. This should be the total amount from all estimated costs above. *



Geli nambarka oo dhan kaliya. Ha gelin wax qoraal ah, hakad ah, ama jajab tobanle.

Qadarka lacagta soo harta, fadlan soo koob ama hoos u dhig si waafaqsan lamberka 10aad. Tusaale ayaa hoos ku qoran.

Tusaale: haddii aad u codsatay \$10,000 shaqaalaha iyo \$10,000 oo ah adeegyada daweynta, waxaad geli doontaa "20000" su'aashan.

Tusaale: Haddii qiimaha qalabka taageerada/la qabsiga uu yahay \$10,000.50, geli "10001".
Haddii qiimaha qalabka taageerada/la qabsiga uu yahay \$10,000.25, geli "10000".

13. Akhri oo oggolow dhammaan shuruudaha iyo xaaladdaha adiga oo calaamadeynaya sanduuq kasta. Xaalad kasta iyo shuruud kasta waxay u baahan tahay jawaab si loo gudbiyo codsigaaga.

Terms and Conditions:
*(You must fill out all fields with a * next to them in order to submit the application.)*

I certify that the information I have provided on this application is true and correct. *

I will spend the Complex Needs Fund award on the purchases outlined in this grant application. *

I will spend the Complex Needs Funds within one year of receiving the funds. *


14. Guji "Submit."

15. Guji "Submit" mar labaad haddii aad hubto inaad diyaar u tahay inaad gudbis. Markaad gujiso gudbi, codsigaagu waa kama dambays, mana awoodi doontid inaad mar kale wax ka beddesho.


Submit Application

Are you sure you want to submit this application?


16. Shaashadda Gudbinta waad ku Guuleysatay ayaa soo bixi doonta. Guji "xir."



a. Haddii aad isku daydo inaad gujiso codsiga deeqda mar labaad, waxaa soo bixi doonta fariin "hore ayad u codsatay".



17. Guji "Grant History" si aad u aragto codsiga deeqda ee aad gudbisay.



18. Guji "View" si aad u furto PDF ka ee codsiga deeqda la gudbiyay.

The screenshot shows the Washington State Department of Children, Youth & Families portal. At the top, there is a navigation bar with links for 'Provider Name', 'Licensing', 'Early Achievers', 'Grant Information', 'Help', and 'Logins'. Below this is a green bar with 'Grant History' and 'Current Grants' tabs. The main content area is titled 'History' and includes a filter section with 'Covid Grants' and 'Other Grants' checkboxes. A table below lists grant applications with columns for 'Grant Application Date', 'Description', 'Grant Amount', and 'Grant Application'. A 'View' button is highlighted in red in the 'Grant Application' column of the first row.

Grant Application Date	Description	Grant Amount	Grant Application
08/31/2021			View

19. Guji "Download as PDF" si aad u kaydsato nuqulka codsigaaga.

The screenshot shows a document viewer interface. At the top, there are two buttons: 'Download' and 'Download as PDF'. The 'Download as PDF' button is highlighted with a red box. Below the buttons, the Washington State Department of Children, Youth & Families logo is visible.

Lifaaqa B: Su'aalaha Inta badan La Isweydiiyo

S: Yaa u qalma Sanduuqa Baahiyaha culus ee Xanaanada Carruurta?

J: Shatiga furan, la shahaadeeyay, ama shahaado bixinta lacag bixinta kaliya bixiyayaasha xanaanada cunugga ayaa u qalma*. Bixiyayaasha FFN ee shatiga laga dhaafay ee ugu yaraan hal ilmo ugu adeegay kaalmada afar ka mid ah lixdii bilood ee la soo dhaafay ama laba ka mid ah saddexdii bilood ee la soo dhaafay oo codsada kabidda Nidaamka Lacag bixinta Adeegga Bulshada (SSPS) wakhtiga codsiga sidoo kale waa u qalmaan. Bixiyayaashu waa inay sidoo kale haystaan carruur hadda ku diiwaangashan daryeelkooda baahiyaha dabeecadda, dib u dhaca korriinka, naafanimada, ama baahiyaha kale ee gaarka ah.

* Bixiyayaasha shatiga haysta ee u adeegaya boosaska ECEAP uma qalmaan Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafan ee Xanaanada Carruurta. Taa beddelkeeda, waa inay ka dalbadan Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafan iyagoo sii maraya qandaraaslayaashooda ECEAP.

S: Waa maxay baahi culus?

J: Baahiyaha culus waxaa ka mid ah baahi kasta oo dabeecadeed, dib u dhac koritaan, nafo, ama baahiyo kale oo gaar ah oo uu ilmuhu yeelan karo. Ma aha inay noqoto xaalad la baaro ama la ogaan karo. Tusaale ahaan, ilmaha u baahan qol dheeraad ah si uu u socdo sababtoo ah waxay u baahan yihiin gargaar dhaqdhaqaaq waxa laga yaabaa inay qabaan baahi culus. Ilmaha u baahan feejignaan dheeri ah sababtoo ah waxay u dhaqmayaan duruufo guriga ka jira ayaa sidoo kale laga yaabaa inay qabaan baahi culus.

S: Sidee loo isticmaali karaa lacagahan?

J: Lacagaha deeqda waxaa loo isticmaali karaa in lagu daro shaqaale cusub ama lagu kordhiyo saacadaha xubnaha shaqaalaha ee hadda, adeegyada daawaynta, hagaajinta xarunta si loo waafajiyo shuruudaha sharciga dhaqdhaqaaq sahlana ADA ama baahiyaha dabeecadda, iyo agabka iyo qalabka taageerada iyo la qabsiga. Bixiyayaasha waa in ay codsadaan lacag mid ama in ka badan oo ka mid ah qaybahan oo ay sharaxaan sida ay u isticmaali doonaan lacagaha ay codsadaan. Bixiyayaasha waa inay ku ogolaadaan inay ku bixin doonaan dhaqaalaha deeqda kharashaadka lagu sheegay codsigooda la ansixiyay.

DCYF ma maalgelin karto codsiyada aan caddayn waxa maalgelinta loo isticmaali doono.

DCYF ma maalgelin karto codsiyada codsanaya kharashyada la diiday. Akhri [Lifaaqa C](#) ee buug-gacmeedka liiska alaabta aan u qalmin.

S: Lacagtan deeqda ah ma loo isticmaali karaa dib u bixinta iibsigi hore?

J: Maya, maalgelintan waxa kaliya loo isticmaali karaa agabka lagu aqoonsaday codsiga deeqda kadib

deeqda waa la oggolaaday oo lacagahii wuu helay bixiyahu.

S: Miyaan codsan karaa lacagta shaqaalaha si aan u bixiyo mushaharkayga?

J: Maya. Waxaad u isticmaali kartaa lacagta si aad u qorto shaqaale cusub ama aad u kordhiso saacadaha shaqaalaha hadda jira. Uma isticmaali kartid lacagaha si aad u daboosho mushaharka hadda jira ama kharashyada hawlgelinta guud ee la xidhiidha mushaar bixinta sida dheefaha, kordhinta ama gunnada haynta.

S: Sidee Sanduuqa Baahida culus ee Xanaanada Ilmaha uga duwan yahay deeqihii hore ee DCYF?

J: Deeqdani waa mid tartan ah. Waxaan ka rabnaa bixiyeyaasha inay noo sheegaan waxa ay ku samayn doonaan dhaqaalaha si ay u taageeraan baahiyaha ubadka (carruurta) ay daryeelayaan. Codsiyada dhibco yaa la siiyey oo kuwa hela sagaal dhibcod ama ka badan yaa loo tixgelin doonaa inay u qalmaan maalgelin. Guddi dib u eegis ayaa go'aamin doona codsiyada la maalgelinayo. Xogta laga helo codsiyada ayaa loo isticmaali doonaa si loo kala hormariyo maalgelinta.

S: Yaa ku jira guddiga dib u eegista?

J: DCYF waxay isugu yeeri doontaa guddi dib u eegis oo ka kooban gudiyo gudaha iyo dibadda ah oo ay ku jiraan, laakiin kuma koobnaan doonto kuwan soo socda:

- La-talinta Caafimaadka Maskaxda ee Dhallaanka iyo Carruurnimada Hore
- Khabiirada Helitaanka Luqada Laba-luqadlaha
- Guulaystayasha hore
- Shati bixiyeyaasha Xanaanada Carruurta
- Heerka Baahida Gaarka ah ee Kaalmada Daryeelka Ilmaha
- Deeqaha Xanaanada Carruurta
- Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Barnaamijka Caawinta (ECEAP)
- Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Hore ama khabiir ku takhasusay mawduuca

S: Muhiim ma tahay waqtiga aan soo gudbiyo codsigayga?

J: DCYF dib uma eegi doonto arjiyada ilaa mudada soo gudbinta ay dhamaato. Dhib ma leh marka codsiga la soo gudbiyo, ilaa inta ay ku jirto xilliga codsiga. Bixiyeyaasha si weyn ayaa loogu dhiirigeliyay inay isticmaalaan kaalmada farsamada marka ay dalbanayaan waxaana lagu dhiirigelinayaa inay waqtigooda ku qaataan codsiga. Bixiyeyaashu waxay keydin karan codsigooda oo ku soo laaban karan mar dambe.

DCYF waxay aad ugula talinaysaa in bixiyeyaasha aanay sugin ilaa daqiiqada u dambaysa si ay u buuxiyaan codsiga. Soo gudbinta codsigaaga ka hor wakhtiga kama dambaysta ah waxay kaa caawin doontaa inaad ka hortagto arrimo farsamo ama dhibaatooyin daqiiqadaha ugu dambeeya kuwaas oo laga yaabo inay kaa horjoogsadaan inaad soo gudbiso codsigaaga. DCYF ma awoodo inay aqbasho codsiyada ka dib wakhtiga kama dambaysta ah.

S: Miyaan u baahanahay inaan ka jawaabo su'aal kasta oo ku jirta codsiga?

J: Afarta su'aalood ee hore ayaa loo baahan yahay. Su'aalaha 6-9, bixiyeyaasha waxay u baahan yihiin oo kaliya inay ka jawaabaan su'aalaha qaybaha kharashaadka ay dalbanayaan. Haddii

bixiyaha uu doorto qaybta kharashka, waxaa looga baahan yahay inay ka jawaabaan dhammaan su'aalaha hoose ee qaybta kharashka. Su'aasha 10aad ayaa loo baahan yahay. Bixiyeyaasha waa inay si taxadar leh u akhriyaan shuruud kasta, ka dibna calaamadeeyan sanduuqa muujinaya inay ogol yihiin.

S: waan dalbaday. Maxaa dhacaya marka xiga?

J: Codsigu wuu furnaan doonaa ilaa Janaayo 3, 2024, 5:00 galabnimo. Kadib marka arjiga xirmo, waxaa dib loo eegi doonaa u-qalmitaanka iyo dhibcaha. Kadib, guddiga dib u eegista ayaa kulmi doona si ay u gaaraan go'aannada maalgelinta. Go'aamada waxaa lagu dhawaaqi doonaa Maarso 2024. Bixiyeyaasha waxa lagu wargelinayaa heerka codsigooda, iyago bixiyeyaasha codsiyadooda la oggolaaday ay heli doonaan maalgelin 2-4 toddobaad gudahooda ee ogeysiiska oggolaanshaha.

S: Suurtagal ma tahay in la igu abaal mariyo lacag ka yar intii aan codsaday?

J: Haa. Haddii lagu siiyo lacag deeq ah oo ka yar intii aad codsatay, DCYF waxay ku ogeysiin doonta oo kuu sharxi doonta qaddarka lagu siiyay iyo sababta ay uga duwanaan karto codsigaagii asalka ahaa.

S: Haddii aan u qalmo oo aan codsado deeq, xaq ma u leeyahay in aan helo deeqda?

J: Maya, lacagta deeqdan ee ay qoondeeyeen Golaha Sharci-dejintu kuma filna in lagu maalgeliyo codsi kasta. Kaliya codsiyada dhameystiran oo si macquul ah loo faahfaahiyay ayaa la tixgelin doonaa (fadlan eeg [Hagaha Dhibcaha Codsiga](#) wixii macluumaad dheeraad ah). Haddii aan helno codsiyo ka sii dhammaystiran oo macquul ah oo faahfaahsan intii aan awoodno inaan maalgelinno, waxaan mudnaanta siin doonnaa codsiyada ku saleysan xogta laga soo ururiyay dhammaan codsiyada.

S: Haddii la ii doorto maalgelin, sideen ku heli karaa lacag?

J: DCYF waxay ka baaraandegi doontaa lacagaha iyada oo loo marayo Nidaamka Lacag bixinta Adeegga Bulshada (SSPS). Bixiyeyaasha waxay u heli doonaan Sanduuqa Baahiyaha Isku-dhafaan ee Xannaanada Ilmaha si la mid ah sida ay caadi ahaan uga helaan lacagaha kaalmada ah DCYF.

S: Haddii la ii doorto maalgelin, goormaan filan karaa in aan helo lacag?

J: Lacag-bixinta waxa lagu samayn doonaa 2-4 toddobaad gudahooda laga bilaabo ogeysiiska oggolaanshaha waxayna ku xiran tahay habaynta boostada USPS iyo waqtiyada lacag bixinta elektiroonigga ah ee hay'addaada maaliyadeed.

S: Deeqdani mala canshuuraya?

J: Haa. Lacagta deeqda waxaa loo tixgeliyaa dakhli. DCYF waxay soo dirtaa 1099 Janaayo kasta ujeedooyin canshuureed. 1099 waxaa ku jira dhammaan lacagaha DCYF ee lagu bixiyay xilliga sanadka cashuurta.

S: Lacagahan deeqda ah miyay u baahan yihiin in lagu kharash gareeyo waqti go'an?

J: Lacagta deeqda waa in lagu kharash gareeyaa hal sano gudaheed marka la helo. DCYF ma awoodo inay u ogolaato kordhinta bixiyayaasha inay kharash gareeyaan lacagaha.

S: Miyaan codsan karaa deeqdan wax ka badan hal mar?

J: Haa. Haddii aan lagu dooran maalgelin, waxaad mar kale codsan kartaa wareegga xiga. Bixiyayaasha waxay heli karaan kaliya Sanduuqa Baahiyaha culus hal mar sanad xisaabeedka (Julaay 1 - Juun 30).

S: Maxaa dhacaya haddii baahidayda ugu weyn ee maalgelinta ay isbeddesho inta u dhaxaysa marka aan codsanayo iyo marka la i siiyo lacagta? Ama maxaa dhacaya haddii aan u baahdo inaan isbeddel ku sameeyo qayb ka mid ah jidka mashruucayga?

J: Isla markiiba nala soo socodsii haddii arrimuhu is beddeleen. Iimayl u dir dcyf.childcaregrants@dcyf.wa.gov oo leh xariiq mawduuca "Qorshaha Kharashka Baahiyaha Adag." Waxaan u qiimeyn doonaa codsiyadan kiis kiis.

S: Miyaan u baahanahay inaan kaydiyo oo aan soo gudbiyo rasiidhada la xidhiidha deeqdan?

J: Haa. Bixiyayaasha waa in ay keydiyaan rasiidhada wax iibsiga ee lagu sameeyay lacagaha deeqda ah muddo shan sano ah. Bixiyayaasha waxaa laga yaabaa in la weydiisto inay u soo gudbiyaan rasiidhadan DCYF. Haddii bixiyaha uusan awoodin inuu bixiyo rasiidhada iyo dukumeentiga marka la codsado, waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay dib u bixiyaan qayb ama dhammaan lacagaha deeqda ah.

S: Ma jiraan shuruudo kale oo warbixineed oo la xidhiidha deeqdan?

J: Haa. Bixiyayaasha waxaa looga baahan doonaa inay dhamaystiraan sahanka saddex biloodlaha ah ee ku saabsan sida mashruuca deeqdoodu u socdo. DCYF waxay doonaysaa inay hubiso inay u taageerayso bixiyayaasha si habboon waxayna rajaynaysaa inay qabato arrin kasta inta lagu jiro habka deeqda iyadoo ay weli jirto wakhti lagu caawiyo bixiyayaasha inay ka shaqeeyaan. Bixiyayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay soo gudbiyaan wixii jawaab celin ah oo ay ka qabaan habka deeqda ama sida deeqda u socoto, sidoo kale.

S: Waa maxay wakhtiga deeqda?

J: Taariikhdu qiyaas ahaan waa tan hoose. Taariikhaha waa la bedeli karaa iyadoo lagu saleynayo tirada codsiyada la helay iyo waqtiga go'aaminta maalgelinta.

Codsigu waa furmay	Nofeembar 15, 2023
Codsigu waa xidhmayaa	Janaayo 3, 2024 saacadu markay tahay 5:00 galabnimo.
Codsiga Dhibcaha Hore	Janaayo 2024
Codsadayaasha waa la ogeysiisay inay yihiin kuwa u dambeeya iyo in kale	Febraayo 2024
Guddiga dib u eegista ayaa kulmaya	Febraayo/Maarsa 2024

Codsadayasha kama dambaysta ah waxaa la ogeysiinayaa go'aamada abaalmarinta	Maarso 2024
Lacag bixinta wa la diyaariyay	2-4 toddobaad kadib ogeysiisyada oggolaanshaha abaalmarinta
Warbixinta rubuc-billaha ah, rubuci 1	Juun 2024
Warbixinta rubuc-billaha ah, rubuci 2	Oktoobar 2024
Warbixinta rubuc-billaha ah, rubuci 3	Janaayo 2025
Warbixinta rubuc-billaha ah, rubuci 4	Abril 2025
Dib u eegista rasiidka (tusaale ahaan muunada gaarka ah ee deeq-bixiyayaasha)	Maarso/Abril 2025

S: Maxaa dhacaya haddii aan xidho shatigayga kadib markaan helo deeqda?

J: Haddii bixiyaha uu helo deeqda oo uu xiro shatiga, waa inay u soo celiyaan wixii deeq ah ee deeqda ah DCYF. Bixiye ayaa weli mas'uul ka noqon doona inuu bixiyo warbixinta iyo rasiidhada DCYF si uu u faahfaahiyo lacagaha ay kharash gareeyeen, iyadoon loo eegayn xaalad furan ama xiran.

S: Ma jirtaa wakhti kama-dambays ah oo lagu codsanayo deeqdan?

J: Haa. Xilliga kama dambaysta ah ee codsiga waa Janaayo 3, 2024, 5:00 galabnimo.

S: Goorma ayaan wax badan ka ogaan karaa wareegga xiga ee maalgelinta deeqdan?

J: Macluumaad dheeraad ah ayaa lagu dhejin doonaa [shabakada Sanduuqa Baahiyaha culus ee Xanaanada Carruurta](#) marka la heli karo. DCYF waxay ugu soo diri doontaa iimaylka cusboonaysiinta bixiyeyaasha shatiga leh. Macluumaadka waxaa sidoo kale lagu dhejin doonaa onlayn <https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/child-care-grants>

Lifaaqa C: Alaab/adeegyo aan u qalmin

Alaabta/Adeegyada liiskan ku jira looma oggola maalgelin. Liiskani maaha mid dhamaystiran laakiin waxaa loola jeedaa in lagu muujiyo tusaalooyin codsiyo aan la oggolayn.

Haddii codsigaaga uu ku jiro mid ka mid ah alaabta/adeegyada soo socda, codsigaaga lama oggolaan doono.

Haddii wadarta cadadka aad codsatay ee aad ku gelisay su'aasha 10. aanay u dhigmin isku darka cadadka qorshahaaga kharash bixinta ee codsigaaga, codsigaaga lama ansixin doono.

DCYF waxay dib u eegi doontaa codsi kasta si ay u go'aamiso haddii codsiyada bixiyaha ay u qalmaan oo ay buuxiyaan shuruudaha Sanduuqa Baahiyaha Adag.

Kharashyada Hawlaha Guud **loma** ogola isticmaalka Sanduuqa Baahiyaha culus. Kuwani waa kharashyo loo baahan yahay si joogto ah loogu socodsiyo ganacsigaaga. Waxay ka mid yihiin, laakiin kuma koobna kuwan soo socda:

- Mushaharka shaqaalaha hadda jira
- Mushaharka laftaada/mushaharka mulkiilaha
- Kiro/Dayn-bixin
- Lacag bixinta tamarta
- Naqshadeynta ka shaqenta beerta ujeedooyin aan ka ahayn taageeridda carruurta leh baahiyo adag
- Codsiyada saadka guud (ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn; daabacayaasha, warqad nuqul ah, iwm)
- Qalabka guud ee daryeelka carruurta oo aan si toos ah u taageerin carruurta leh baahiyo culus
- Cunto iyo/ama sahay cunto oo aan si toos ah u taageerin carruurta leh baahiyo culus
- Canshuuraha
- Kharashyada waxtarka ee shaqaalaha hadda jira
- Kordhinta/ Gunnooyinka/ Gunnooyinka Haysashada ee shaqaalaha hadda jira
- Mushaharka beddelka
- Kharashaadka safarka shaqaalaha ee tababarka (gaaska, kharashka baarkinka, iwm)
- Tababarka shaqaalaha, Tababarka Macalimiinta ama Tababarka Horumarinta Xirfadlayaasha
- Manhajka ama agabka tababbarka Macallinka ama Horumarinta Xirfadda

Kharashyada kale ee **aan** la oggolayn:

- libka baabuurta
- Cusboonaysiinta xarunta guud
- Dhisidda dayr cusub
- Ka saarida darbiga rarka qaada
- Dhisidda guri dheeri ah (dhisidda qol cusub (gudaha ama dibadda), guryo yar-yar, dhisidda daaq)
- Rinjiyeynta bannaanka xarunta
- Dhisidda musqul bannaanka ah
- Nidaamyada Ammaanka Xarunta
- Hawlaha Diinta: Wa inaad lacagta deeqda u isticmaalin ujeedo diimeed ama hawl kasta, oo ay ku jiraan cibaadada ama tilmaamaha.

- Sahayda guud ee barnaamijka daryeelka ilmaha oo aan gaar u ahayn ilmaha leh baahiyo culus
 - Tusaale ahaan; "Waxaan u baahanahay kuraas sare oo cusub fasalka socod-baradkayga" **lama** ogola, laakiin "Waxaan u baahanahay kursi sare oo ay ansixisay sharciga ADA ilmaha ku jira daryeelkayga oo leh baahi adag" waa la ogol yahay.
 - Tusaale kale: "Waxaan u baahanahay meel sare oo loogu talagalay carruurta mustaqbalka ee leh baahiyo adag si ay u xaadiraan daryeelka ilmahayga." Tani waa mid aan u qalmin sababtoo ah baahida la soo bandhigay waa inay noqotaa ilmaha hadda ku qoran.